Peace Research Institute Oslo (PRIO)
PO Box 9229 Grønland, NO-0134 Oslo, Norway
Visiting Address: Hausmanns gate 3

www.prio.org
Facebook: PRIO.org
Twitter: PRIOUpdates

ISBN: 978-82-7288-757-4 (print)
978-82-7288-758-1 (online)

PRIO

PRIO POLICY BRIEF 24|2016

# Isla-xisaabtanka Nidaamka Cashuuraha ee Somaliland

Waxa jira tiro caqabado dhab ah oo hortaagan isla-xisaabtanka la xidhiidha nidaamka cashuurta ee Somaliland. Caqabadahan waxa ka mid ah maqnaanshaha dood qaran, daahfurnaan, iyo xog-siin sax ah iyo hannaanka fulinta. La-xisaabtankan liita waxa uu sabab u yahay kalsooni liidata oo u dhaxaysa dawladda iyo muwaadiniinteeda. Arrintani waxa ay ku xoogantahay gobolada qaar sida Sool, oo ah gobol joogitaanka dawladdu yahay mid liita amaba moran ka taaganyahay. Haddana, haddii in badan oo cashuurbixiyeyaashi ahi ay rabaan in ay bixshaan cashuurta iyada oo aan lagu qasbin, arrintani waxa ay calaamad u tahay in ay jirto kalsooni [ka dhaxaysa dawladda iyo muwaadiniinta]. Arrintani waxa ay muujinaysaa in ay jirto fursad iyo suuragalnimo in wax la hagaajinkaro, iyada oo loo marayo wacyigalinta bulshada, muwaadiniinta caadiga ah oo heli kara hababka la xisaabtanka, iyo in maalgalin joogta ah lagu sameeyo dib-u-hagaajinta cashuuraha ee hadda socda.

## Qodobbo Kooaban

- Nidaamka cashuuraha ee Somaliland waxa uu la daalaadhacayaa sharci cashuureed gaboobay oo murugsan iyo sidoo kale nidaam cashuur ururineed oo aan isku-dubbaridnayn oo ay ka maqantahay habab fulineed sax ah iyo awooddii lagu tabobari lahaa shaqaalaha
- Awoodda fulineed ee liidataa waxa ka dhigaysa dawladda mid ku tiirsan daneeyayaasha bulshada sida odayaasha, baayacmustarka iyo hogaamiyayaasha diinta is loo fuliyo siyaasadda cashuuraha.
- Waxa jira afar sababood oo ka danbeeya in cashuurbixiyuhu bixiyo cashuurta sida in uu ka badbaado cidhib-xumada arrintaasi leedahay, in uu daacad u yahay dal aan caalamiyan la ictiraafsanayn,in ay taageeraan bixinta adeegyada aasaasiga ah iyo in laga taakuleeyo dawladda maadaama ay ilaalinayso nabadgalyada iyo ammaanka.
- Cashuur bixintu waxa ay si aad ah ugu xidhantahay inta uu awood u leeyahay cashuur bixiyuhu in uu kabaxsankaro cashuur bixinta, gaar ahaan cashuuraha ay baxshaan sharikadaha waawayn oo aan ka tarjamayn awoodda iyo dakhliga shirkadaha.

Ebba Tellander *Peace Research Institute Oslo (PRIO)*
Mohamed Aden Hassan *Goldsmiths, University of London*

## Cashuurtu waa Dhuuxa xidhiika ka dhaxeeya dawladda iyo muwaadiniinta

Cashuurtu waxa ay sal-dhig u tahay sida dawladda iyo muwaadiniinteedu u wada xidhiidhaan. Cashuurta la ururiyaa waa saldhig dhaqaale ee waddan leeyahay una suuro galiya ilaalinta ammaanka iyo bixinta adeeggyada bulshada sida caafimaadka, kaabayaasha, waxbarashada iyo sidoo kale xasiloonida iyo kala-danbaynta. Marka la gaadhayo go'aamada la xidhiidha xaddiga cashuurta iyo qorshayaasha isticmaalka dakhliga waxa iman kara dood bulsho oo u dhaxaysa cashuur bixiyayaasha iyo dawladda. Wadaxaajooka noocan ahi waxa uu awood u leeyahay in uu kor u qaado xidhiidhka isla-xisaabtan ee ka dhaxeeya dawladda iyo muwaadiniinta, oo macnaheedu yahay in siyaasad dajiyayaasha iyo fuliyayaashu ay ogalyihiin la xisaabtanka dadka go'aamadoodu saamaynta ku leeyihiin. Intaa waxa dheer, in cashuur ururin wanaagsani ay hagaajin karto awooda haydaha dawladda arrintaas oo iyana fududayn karta hababka isla-xisaabtanka. Sidaa awgeed, xaaladda la- xisaabtan ee nidaamka cashuurtu waxa ay wax badan ka tilmaamaysaa xidhiidhka ka dhaxeeya dawladda iyo muwaadiniinta.

Dawladda Somaliland waxa ay leedahay nidaamyo kaladuwan oo maamula bulshada sida nidaamka maamul ee rasmiga ah oo ay ka mid tahay xukuumad la doorto, nidaam garsoor oo casri ah, nidaam dhaqameed maamul iyo xeer qabiil iyo shariicadda. Nidaamyadani waa qaar is barbar socda waana ay is dhammaystiraan, isdhex-galaan sidoo kalena waxay iskaga-horyimaaddaan habab kakkan. Qeexidda iyo baadhitaanka heerka isla-xisaabtan ee ka jira nidaamka cashuuraha, daraasaddan waxa ujeedkeedu yahay in ay bildhaamiso heerka xidhiidhka rasmiga ah ee u dhexeeya dawladda iyo muwaadiniinteeda, taas oo ay ka mid tahay sida hababkii isla-xisaabtankee soo jireenka aha uga nidaamka rasmiga ah. Daraasaddu waxay ku salaysan 40 waraysi oo laga qaaday cashuur-bixiyeyaal, cashuur ururiyayaal iyo masuuliyiinta ka shaqaysa hay'adaha la xidhiidhka la leh ee ka jira magaalooyinka ugu muhiimsan lixda gobo lee Somaliland (Awdal, Maroodi jeex, Saaxil, Togdheer, Sool iyo Sanaag).

## [Nidaamka] Cashuuraha ee Somaliland

Markii ugu horraysay Somaliland nidaamka cashuuraha waxa soo kordhiyay maamulkii maxmiyadda Ingiriiska, hayeeshee dadka reer Somaliland waxa ay u arkeen cashuurta culays aan gar ahayn, taas oo ay ka hor yimaaddeen. Laga soo bilaabo muddadaa waxii ka danbeeyay nidaamka cashuuraha waxa ku dhacay isbaddallo, iyadoo oo haddana isla markaa, sharciyadu aanay isla baddalin hadba waayaha dhaqaale madaama intabadan sharciyadani ay yihiin dhaxalkii muddadii Siyaad Barre uu maamulayay Soomaliya oo ay ka mid ahayd Somaliland, laga soo bilaabo sannadkii 1969 ilaa bilawgii dagaalki sokeeye ee 1991.

Hadda, Somaliland malaha siyaasad cashuureed cad oo rasmi ah dhanka kalena ururinta waajibaadka dawladu ku leedahay dadka iyo cashuuraha ee Somaliland waa mid filiqsan/jaantaa rogan ah oo aan lahayn kaabayaal sharci oo haboon iyo mid hay'adeed oo taageera. Halbeeg-cashuureedku waa mid yar sababta oo ah waaxda aan rasmiga ahayn ee dhaqaalaha oo ah mid ballaadhan, korriinka dhaqaale ee hooseeya iyo xaqiiqada ah in shirkadaha ugu waawayni aanay bixin cashuur u dhiganta dakhligooda. Sannadihii u danbeeyay nidaamka cashuur ururintu waxa uu iskabadalay nidaam aan rasmi ahayn waxa aanu noqday hab ku salaysan farsamo iyo sidoo kale nidaam iskii isku wada. Dibuhabaynta waxa qayb ka ah hannaanka maamul daadajinta, oo ah in awoodda iyo hawlaha dawladda dhexe lagu wareejo maamulada heer degaan. Inkasta oo nidaamyada iyo qaab-dhismeedyadu ay noqdeen qaar xirfad ku salaysan, hadana dib-u-habayntu waa mid ka foog dhammaystiran. Sidaa awgeedna, fulinta ayaa ah caqabad dakhliga cashuuraha ka soo xeroodaana waa mid hooseeya. Dhankeeda, dawladdu ma haysato ilo dakhli oo ku filan si ay u bixiso adeegyadii loo baahnaa.

Adeeg bixinta liidata waxa ay yaraysaa xamaasadda cashuur bixiyuhu u qabo bixinta cashuurta inbadan oo ka mid ah cashuurbixiyayaashuna waxa ay isku dayaan in ay ka dhuuntaan cashuur bixinta, halka qaar kalena ay kaliya cashuurta u baxshaan si ay iskaga ilaaliyaan cidhib xumada ka imman karta bixin la'aanta sida in laga xidho meheradahooga, ama sida dhaqanku yahay magaalooyinka qaarba, in lagala baxo albaabada guryaha. Tusaale muujinaya arrintan ayaa ah, sida ay dhawr qof tilmaameen, in ay baxshaan cashuurta wadamarista sababta oo ah ma jecla in la dhibo marka ay jidka marayaan. Sidoo kalena waxa ay farta ku fiiqeen in kastoo ay baxshaan cashuurta hadana xaaladaha jidadku sii xumaanayso, sidaad darteedna aanay wax kalsooni ah ku qabin in lacagtu aanay gaadhayn meeshii la rabay. Qodob muhiim ah ayaa ah marka arrintan laga hadlayo awoodda ay cashuur bixiyayaashu u leeyiniin ka baxsiga cashuur bixinta. Cashuuraha ay baxshaan sharikadaha waawayni uma dhiganto baaxadda ganacsiga iyo dakhliga, maadaama ay haystaan khayrad, xidhiidho, iyo awood galaangal oo lagama maarmaan ah si ay u helaan cashuur dhaaf dhammaystiran.

## Maqnaanshaha Xog Dhammaystiran

Isla-xisaabtanku waa mid hooseeya marka la eego nidaamka cashuurta waxana jira qodobbo badan oo saamayn ku leh arrintan. Cashuurbixiyaasha diraasaddu waraysatay waxa ay muujiyeen in jiritaan la'aanta xog ku filan oo laxidhiidha xuquuqdooda iyo waajibaadkooda iyo gaar ahaan waxa lagu samaynayo lacagaha ka soo xarooda cashuurta kadid marka la soo ururiyo. Heerka daah-furnaanta oo hooseeya waxa ku abuuraya chashuur bixiyayaasha shaki ku saabsan in lacagaha cashuurta ee la urursha ay wax saamayn ah ku leedahay adeegyada guud, iyada oo si gaar ah loo eegayo tayo xumada adeegyada la baxsho. Taa baddalkeed, dad badan ayaa ka cabsi qabi in inta badan dakhliga soo xerooda uu ku lumo musuqmaasuq. Xaaladaha qaar, sida uu faahfaahinayo Faarax Nuur Askar, dhaqanka musuqmaasuqu waxa uu dhaca iyada oo ay arkayaan cashuurbixiyayaashu:

> *Mararka qaar marka cashuur ururiyuhu kaa qaadayo chahuurta ayaa waxa dhacda in laba u qaybshaan lacagtii; qayb waxa ay ku qoraan juwanka lacag-qabashada qaybta kalena waxa ay ku ritaan jeebka.*
>
> Faarax Nuur Askar, Hargeysa

Inkasta oo dibu-habaynta cashuuraha ee cusub loogu talo galay in ay ka hortagto xatooyada iyada oo soo kordhisay hannaan cashuur ururin oo xirfad ku salaysan side horena ka rasmisan, hadana wali musuqmaasuqu waa mushkilad wayn oo xidhiidh la leh dhaqanka maamul ee aqoonta daran iyo hawlwadeenada cashuuraha oo la siiyo mushaharo yar iyo sidoo kalena aan lahayn tabobar sax ah.

Musuqmaasuq, hannaan maamul oo liita, iyo tiro badan oo ah cashuur ururiyayaal oo aan fahansanayn sharciga iyo hannaanka fulinta ayaa wiiqa nidaamka daahfurnaanta. Intaa waxa dheer in sharciyada cashuuruhu yihiin qaar kakan oo gaboobay waxa kale oo jira dhibaatooyin dhanka isku-dubba ridka ah oo ka dhaxeeya waaxaha kala duwan ee cashuur ururinta. Sidaa darteedna, nidaamka cashuur ururintu waxa uu ku guuldarraystaa in uu hirgaliyo cashuuro iyo tacrifado sax ah. Intaa waxa dheer, ma jirto wax ku waajibinaya in hantiilayaasha meheraduhu ururiyaan xogta lagama maarmaanka u ah in la sameeyo qiimayn cashuureed sax ah. Xaaladan oo kale, cashuur ururiyayaal aan xirfad lahayn ayaa qiimeeya cashuurta iyaga oo ku salaynaya sida meheradda ula muuqato in ay u shaqayso. Sida uu sheegay qof lawaraystay oo leh dhawr dukaan, arrintani waxay keeni kartaa in dukaanka ugu macaashka yar laakin ku muuqda kan ugu wanaagsan in cashuur ka badan laga qaado kan sida wanaagsan u shaqaynaya. Astaamaha kala-daadsanaanta iyo habqanka ee cashuur ururintu leedahay ayaa kobcinaya musuqmaasuq sidoo kalena cashuurbixiyaha ku adkeeyay helidda xog arrintaas oo yaraynaysa kalsoonida lagu qabo nidaamka cashuuraha.

## Hab-raac Isla-xisaabtan oo Liita

Qodobkale oo dabada ka wada la-xisaabtanka liita ayaa ah maqnaanshaha dood qaran oo ku saabsan siyaasadda iyo dhaqangalinta cashuuraha. Waxa jiray isku dayyo dhawr ah oo ah in la gadhsiiyo dadwaynaha xog guud oo la xidhiidha cashuurta iyo ujeedadeeda iyada oo loo marinayo TV-ga, Oll-ole wacyigalin oo raadyaha laga sii daayo, cod-baahiyayaal gawaadhi

saran, amma kulanno ka hadlaya cahsuurta oo ay soo agaasimaan dawladaha hoose. Siwalba aha ahaate, waxa aad mooddaa in isku dayada xidhiidh ee dawladdu uu u muuqdo mid hal dhinac ka socda, aanay ku lamaanayn suurogalnimo dhab ah oo ah in cashuur bixiyayaashu ka war-celin karaan ama heli karaan xog la xidhiidha kharayshgraynta dhabta ee dakhliga la urursay. Tusaale ahaan, kulanada heer degaan waxa ay diiradda saaraan in dadwaynaha loo diyaariyo fulinta siyaasad halkii ay ka ahaan lahayd in la abuuro fursad lagu doodo. Cashuur bixiyayaashii aan la hadallay waxa ay codsadeen in la halo xidhiidh wanaagsan, sida uu sharaxay Cabdilqaadir Cali Suldaan:

> *Way fiicnaan lahayd in aan golaha degaanka kala sheekaysanno arimaha cashuuraha si aan u waydiin karro su'aalo dhammaadka sannadka oo la xidhiidha waxyaabahii ay ballanqaadeen in ay fulinayaan[…] Waxa na faraxgalin lahaa in wadashaqaynta la hagaajiyo is xogtaa loo wadaago, qorshayaashana looga doodo mar hore sidoo kalena arimaha cashuuraha laga wada xaajoodo oo la isku waafaqo.*
>
> Cabdilqaadir Cali Suldaan,
> Ceerigaabo

Qodob arrinkan saamayn ku leh ayaa ah maqnaanshaha dood qaran inkasta oo cashuurbixiyaashu aanay ku qanacsanayn siyasadaha cashuurta ee jira, hadana in aanay cuddudooda u midayn isku day ay ku saamaynayaa siyaasadda lafteeda. Sababta badhkeed ee arrintan ka danbaysa ayaa ah jiritaanka hayado jilicsan oo nidaamka siyaasadeed ee rasmiga ah ka mid oo ay barbar socoto kaalinta muquunineed ee nidaamka qabaligu ku leeyhay gudaha bulshada Somaliland, tan oo macnaheedu yahay in dadku aany laqabsan abuubal ka baxsan heer qabiil. Maqnaanshaha hanaan fulin oo cago adag ku jooga, sida doorashooyinka oo cahuuruhu qayb ka yihiin doodda, dabagal saxaafadeed qaabdhismeedka cashuuraha, iyo kiisas ku jira nidaamka maxkamadaha oo la xidhiidha cashuuraha, ayaa hortaagan awoodda cashuur bixiyuhu u leeyahay in ay codkooda kor u qaadaan dadka talada gacanta ku hayana cadaadis saaraan. Intaa waxa dheer in hay'adaha la-xisaabtanka ee ka midka ah dawladdu sida Guddida la Dagaalanka Musuqmusuqa iyo Hantidhawrka Qaranka, si wanaagsan looma dhaqangalin sababta oo ah dawladda oo jilicsan, maqnaanshaha garsoor cad oo xidhiidhsan oo xoojiya, ka madaxbannaan la'aan [golaha] fulinta, maqnaanshaha maalgalin joogta ah oo muddada fog ah iyo maqnaanshaha cid la xisaabtanta hay'adahan.

Taa badalkeeda, muujinta ay cashuur bixiyayaashu muujiyaan kuqanac la'aanta inta badan waxa ay qayb ka tahay wadahadalka dhexmara cashuur bixiyaha iyo cashuur ururiyaha. Halkan oo kale, waxa laga yaaba in cashuur bixiyuhu uga wareegaan adeegsiga habab la-xisaabtanka oo aan rasmi ahayn. Sida Maxamed Saciid Barkhad u sharxayo:

> *Marka la eego duruufahayaga sida aan u fahansannahay, arimaha waxa lagu xaliya saaxiibtinimo; waxa aad u tagi kartaa qof aad saaxiib tihiin oo saamayn ku leh go'aan gaadhista waxa aadan ka codsankartaa in uu wax kula qabto. Labadiina isku raaci madaxda oo ka codsan in cashuurta wax lagaa dhimo.*
>
> Maxamed Saciid Barkhad,
> Ganacsade, Borama

Shabakaddan saaxiibada ah waxa ay si dhaw ugu xidhan tahay daacadnimada qabiilka[ee dawladda]. Ku qancidla'aanta qabiilku ee cashuurtu waxa laga yaabaa in ay qaadato qaab gacankahadal. Mararka qaar waxa qarxa iska-hor-imaad ka u dhaxeeya cashuur ururiyayaasha iyo cashuur bixiyayaasha gaar ahaan gobalada darafyada, iska-hor-imaadyadanna waxa lagu xalliyaa wadahadallo iyo isku-tanaasul la xidhiidha habka cashuuraha looga hirgalinayo degaankaas. Hogaan dhaqameedka sida kaabba qabiilada ayay u badantahay in ay kaalin ka ciyaaraan wadahadalan. Sidaad darted, degaanada dhismaha dawladdu liito, hababka kale oo dhaqan oo isla-xisaabtan ayaa fursad hela lana falgala maamulka dawliga ah.

## Adeeg bixiyayaal Kale

Heerka Isla-xisaabtan ee hooseeyaa waxa uu xidhiidh la leeyahay maqnaanshaha saamaynta dawladdu ku leedahay nolol maalmeedka cashuur bixiyaha. Adeegyada dhawr ka ah ee la baxshaa waa qaar tayo liita sidoo kalena aan si isku mid ah loo wada gaadhsiin[dadka]. Sidaa awgeed, si loo buuxiyo baahidaa, daneeyayaal kale sida ' bulshada'-kaaba qabiilada, hogaamiyayaasha diinta iyo ganacsatada-ayaa qaata masuuliyadda bixinta adeegyada loo baahanyahay. Tani waxa ay sharciyadda ka sii qaadaa dawladda sida ay u arkaan cashuurbixiyayaashu sida uu muujinayo ganacsade Maxamed Bashiir Faarax:

> *Waxa aan kiraysannaa ilaalo noo waardiyaysa meheradahayaga[…] sidoo kale waxa aan lacag ka bixinaa qashin gurista oo aan siino Horseed[shirkad qashin guris]. Dhamman hawlahan annaga ayaa maaraysanna iyada oo laga yaabo in dawladduna lacagta cashuurta ay ku kharashgareeyaan meel kale sida musharada madaxwaynaha.*
>
> Maxamed Bashiir Faarax,
> Borama

Inkasta oo daneeyayaashan bulshadu ay bixinayaan adeegyo lagama maarmaan ah, hadana dedaaladani waa qaar aad u baahsan/filiqsan oo anan isku dubbaridnayn, in bandanna waxa su'aali ka taagantahay tayada hawlahan sida marka jidad ay bulshado dhisto iyada oo ay ka maqantahay aqoon iyo agab ku filan. Intaa waxa dheer, in mulkiilayaasha ganacsidayada waawayni ay qaadhaanka ay ku daraan adeeg bixinta ay u adeegsadaan doodda ah in loo sameeyo cashuur dhaaf.

## Kala duwanaanshaha Gobolada iyo Arrinta Sool

Mushkilada ku lugta leh xidhiidhka ka dhaxeeya dawladda Somaliland iyo muwaadiniinteeda ayaa kala duwan degaan ahaaan, arrintani waxay sii xuntahay marka la eego gobolada bariga. Arrintan waxa aynu ka dheehanaynaa arrinta Sool oo ah gobol ay ku muransanyihiin,Somaliland, Puntland, Dawaladda Federaalka ah ee Soomaaliya iyo maamul goboleedka madaxabannaan ee aan la aqoonsan ee Khaatumo. Somaliland waxa ay dib u cagadhigatay gobolka Sool dabayaqadii 2007. Sidaa awgeed dadbadan oo degaanka ah ayaa rumaysan in aanay heli karin khayraadka qaranka. Dareenkan cadaalad daradda waxa sii kordhiya arrinta ah in ururada maxalliga ah iyo kuwa Qaramada Midoobayba(UN) ay mar mar dhif ah uun gobolka Sool ku daraan waxqabadkooda sababtuna ay tahay walwal ammaan oo dhab ah kaas oo abuura kala fogaanshaha u dhaxeeya gobolada. Arrintan waxa ka dhasha ayaa ah takoor dhaqaale oo ay sii wanayso in dadkii xirfadda lahaa gobolka ka tagaan maadaama ay u baxaan raadinta fursado nololeed.

Kala duwanaanshaha iyo isbadalka daacadnimda dadka reer Sool iyo kalsooni darrada ay ku qabaan dawaladda Somaliland ayaa saamayn wayn ku l eh rabitaankooda cashuur bixin. Cumar Khadar Cabdulle waxa uu sharxayaa caqabadaha ay la kulmaan marka ay isku dayaan in ay cashuur ka ururiyaan gobolka:

> *Waa ay adagtahay in aad cashuur ka ururiso degaan sidan loo kala duwanyahay. Mararka qaar marka aad waydiiso cashuurta sharciga ah si ulakac ah ayay kuu diidayaan kuuna sheegayaan in maamulkani aanu koodii ahayn.*
>
> Cumar Khadar Cabdulle,
> Laascaanood

Diidmada reeraha qaar oo ay ku lammantahay dawlad liidata ayaa ka dhiga hirgalinta cashuur ururinta mid adag. Maadaama la yaraynayo khatarta in daqaal qarxo, ayaa keenta in mararka qaar cashuur ururintu gabi ahaanba joogsato xilliyad qaar iyo in mararka qaar cashuurta laga qaado cid gaar ah[daneeyayaal]. Inkasta oo arrinta Sool tahay mid gaar ah, waxa ay muujinaysaa in si dawladda baraamijyadeeda u noqdaan qaar hirgala taageerada bulshada degaanka iyo gaar ahaan ta qabiilka,ganacsatada iyo hogaamiyayaasha diinta loo baahanyahay. Guusha isku-day walba waxa uu ku xidhnaanayaa in danta dawladda iyo daneenayaasha degaanku is waafaqdo arrintaas oo goboladu iyo bulshooyinku ay ku kala duwanyihiin.

## Tilmaamaha yar ee Kalsoonida ee la xidhiidha doonista Cashuur bixiyaha ee ah in uu cashuur bixiyo

Meel ay dawladnimadu liidato,fulinta oo kali ahi ma sharxi karto in muwadiniintu wali baxshaan cashuuraha la saaro. Dhab ahaan, inbadan oo ka mid ah cashuur ururiyayaashaa oo aan la hadalay waxay ay sheegeen in rabitaanka cashuur bixiyuhu ay soo kordhayso marka lagu daro gobolada bariga. Sida darted ay jirto debecsanaan dhanka aragtida dadka ah ayna jirtay rabitaan cashuur bixineed haba yaraatee. Mid ka mid ah waxyaahabaha ugu waawayn ee dabada ka riixaya u-hogaansanka cashuurta, sida ay latahay cashuur bixiyayaasha ayaa ah hagaajinta adeeg bixinta oo ay indhahooga ku arki karaan sida ay Sahra Rooble Faarax muujinayso:

> *Gawaadhida gargaarka degdega ahi way naga fogaan jireen hadda se […] jidad ayaa la dhisay, gawaadhidii qashinka ayaa la keenaya, guddaafadda dawladda ayaa gurta aroor walba.*
>
> Sahra Rooble Faarax, Laascaanood

Sidan oo kale ayaa sida dawladda loo arko iyo waxqabadkeedu ay ku xidhnaanayaan waxa laga filayo sida mid ka mid ah cashuurbixiyaashu tibaaxay: " Wax la'aanta ayaa ka xun"(Yaasiin Muuse Mataan, Ceerigaabo). Dan bulsho oo ahmiyaad gaar ah leh oo cashuurbixiyayaal badani ka hadleen ayaa ah nabadgelyada iyo deganaanshaha ay Somaliland ku naaloonayaan. Muuse Axmed Cigaal ayaa sharxaya:

> *Waxa aan Koonfurta kaga duwanahay -ee dhaqaalahanaga dabada ka riixaya-ayaa ah cashuurta oo lagu bixiyo mushaharooyinka ciidanka[iyo]bilayska.*
>
> Muuse Axmed Cigaal, Hargeysa

Dhab ahaan, sababta dawladdu u heshay gabi ahaanba taageerada dhaqaale ee lagama maarmaanka ah bilawgii aasaaskeeda waxay ahayd in bahda ganacsatadu rabtay in ay taageerto hub-ka-dhigis meelmarta oo lagu sameeyo ciidan beeleedyadii iyada oo kalikali loo shaqalaysiinayo intabadanna ciidan ama bilays ahaan iyada oo lagu xidhay in ay dhiibaan hubkooda (Eubank 2012).

Dhawr cashuur bixiye oo aan waraysannay ayaa u muuqday in ay cashuurta u bixinayeen dareen daacadnimo oo ay u hayaan dalka Somaliland, arintan oo sii xoogaysay maqnaanshaha aqoonsi caalami ah iyo ilaa-xadheerka taageerada caalamiga ah ee ay hesho oo hooseysa. Daacadnimadi waxa ay u muuqataa in ay ku xidhantahay baadisooc qaran oo soo if-baxaya oo qayb ka ah hannaanka qarandhiska socda sidoo kalena si dhaw ugu xidhan u daacaadnimada qabiilka iyo cidda hadba reerkoodu qayb ka tahay dawladda. Haddii la tixraaco isla fikirkan, maqnaashaha taageero shisheeye ayaa sidoo kale u muuqata in ay cashuurbixiyaha u janjeedhiso dhanka inuu aamino in adawladdu aanay adeegga bulshada u bixinkarayn heerkii laga filayay ee xilligan, hasa yeeshee in awoodda dawladdo hagaagi doonto marka waqti ka soo wareego.

## Halka looga gudbayo iyo talobixino ka yimid shacabka Somaliland

Inkasta oo xidhiidhka muwaadinka iyo dawladdu ay haystaan tiro dhibaatooyin dhab ahi, haddana waxa lagama maarmaan ah in la sii wado in la wado iyada oo lagu dul dhisayo bildhaanta yaree kalsoonida ah ee jirta. Dhab ahaan, sida Eubank (2012) uu tilmaamay Somaliland waxa ay haysataa bar bilaw qiimo leh. Maadaama dawladdu hesho taageero dibadeed oo yar marka la barbardhigo wadamo badan oo jaarka ah, waxa ay ku tiirsantahay dakhliga ay ururiso. Ku tiirsanaanta cashuurtu, dhankeedaa, waxa ay muwaadinka siinaysa awood gorgortan badan oo ku waajahan dawladda, awooddaas oo suuro galinaysa fursado hay'adaha dawladda lagula xisaabtami karo. Sidaa darteedna waxa jira fursad iyo suurogalnimo lagu hagaajin karo nidaamka cashuuraha.

In badan oo ka mid ah dadka la waraystay, marka ay ka hadlayaan dhibaatooyinka badan ee jira, waxa ay soo jeediyeen talooyin ah sida loo hagaajin karo isla-xisaabtanka korna loogu qaadi karo heerka kalsoonida bulsho ee lagu qabo nidaamka cashuuraha. Talobixinaha ku jira siyaasaddan kooban {policy brief} ayaa ku salaysan soo-jeedinahaa ay soo bandhigeen muwaadiniinta Somaliland.

- In la abuuro wacyi bulsho oo la xidhiidha isla-xisaabtanka nidaamka cashuuraha dhexdiisa oo lagu daro manhajka dugsiyada hoose iyo kan waxbarashada dadka waawayn labadaba. Arrintani waxay ay kor u qaadi doontaa fahamka shacabka ee xuquuqdooda iyo waajibaabkooda ku aaddan nidaamka cashuuraha.
- In lasii wado dib u qaabaynta nidaamka cashuuraha ee lagu hiigsanayo shuruuc cashuureed casri ah, tababar shaqaale oo habboon, misharooyin inta hadda oo la siiyo cashuur ururiyaha iyo isku-dubbarid kordha oo u dhaxeeyaha laamaha kala duwan ee cashuur ururinta.
- In la abuuro hab-raac cabasho oo cad oo sharcigu fulin karo sida sax ahna loo meelmariyo oo cashuur bixiyayaashu ay aadi karaan marka ay dareemaan in lagu xad gudbay.
- In la sameeyo guddiyo bulsho iyo in la caadaysto kulamo joogta ah oo lala yeesho bulshada oo loola jeedo in kor loo qaado daahfurnaanta iyo dood-wadaag oo laga yeesho heerarka kala duwan ee nidaamka cashuuraha oo ay ka mid tahay siyaasad dajinta iyo hirgalintuba. ■

## Akhris Dheeraad ah

Campos, J. T. (2016) 'On Taxes and Suspicion: Ambivalences of Rule and the Politically Possible in Contemporary Hargeisa, Somaliland', *DIIS Working Paper* 2016:5. Copenhagen: Danish Institute for International Studies.

Eubank, N. (2012) 'Taxation, Political Accountability and Foreign Aid: Lessons from Somaliland', *Journal of Development Studies* 48(4): 465–480.

Waxan u mahadnaqaynaa Ahmed Atteye kaalinta uu qaatay cilmibaadhista ee ururinta macluumaadka.

## QOREYAASHA

Ebba Tellander waxa uu Kaaliye Cilmibaadhis ka yahay Machadka Cilmibaadhista Nabadda ee Oslo(PRIO). Maxamed Aadam Xassan waa Cilmi Baadhe la shaqeeye Xarunta Cilmibaadhista Magaalooyinka iyo Bulshada (CUCR) eek u taal Goldsmiths, Jaamacadda London. Waxan u mahadnaqaynaa shirkadda Great Solutions Consulting Firm kaalinta ay qaadatay tarmadda siyaasaddan kooban.

## MASHRUUCA

Siyaasadani koobani waxay qayb katahay mashruuca 'dhinacyada Islaxisaabtanka Somaliland, waxa maal galiyey Mott Mack Donal/DFID. Daraasadan halka sano socoty waxa ay diiradda saaraysay cadaaladda danbiilayaasha, cashuurta iyo daryeelka caafimaadka waxaana fuliyay PRIO oo kaashatay cilmibaadhayaal reer Somaliland ah. Xog intaa kabadan ka eeg: www.prio.org/accountability

## PRIO

The Peace Research Institute Oslo (PRIO) waa machad cilmibaadhista nabadda ah oo aan faa'iido doon ahayn ( waxa la aasaasay 1959) ujeedadiisa ugu waynina waa inuu ku sameeyo cilmibaadhis xaaladaha xidhiidhka nabadgalyo ee ka dhaxeeya dawladaha, kooxaha iyo dadka. Machhadku waa mid madaxbanaan, caalami ah waxaanu baadhitaan ku sameeyaa mawduucyo kala duwan, waxa aanu sahamiyaa arimaha laxidhaadha dhinacyada kala duwan ee nabadda iyo khilaafka.